

SOOYAAALKA SIINLEY

IYO

BUUGAAGTA LAGA QORAY:

Febraayo 23,2016

Bahda Mareegta Farshaxan

Ummada ku hadasha afka-Soomaaliga ee ku kala sugar daafaha dunida, kana soo kala jeeda dalalka Kenya, Somaliland, Itoobiya, Soomaaliya iyo Jabuuti ayaa lagu tirin jiray bulsho afeed(Oral Society). Gu'yaalkan danbe waxaa aad isku badalaya odhaahdaasi, waxaaney bulshadani kaalin wax ku ool ah ka qaadaneysoo siday afkooga ugu qori lahaayeen taariikhloododa, dhaqankoooga, suugaantoodaba, iwm.

Waxaa sidoo kale sii kordhaya tirada ururada qalinka adeegsada, waxaa sii kordhaya xarumaha kaydiya qoraalada qalin-maalika. Waa guul u soo korodhay bulsho weynta Soomaalida. Waxaa sidoo kale muuqaneysa in buuggaag dhawr ah ay dhawr qalin-maal ka qorayaan dhacdo kali ah, silsilad maanso, iwm.

Tani waxay muujinaysaa in qalin-maalku ay soo bandhigayaan sida ay u kala arkeen dhacdadaa iyo sida ula jaanqaadi karto waayaha jira. Tusaale ahaan Silsilada Deelleey ee curatey dabayaqaadii gu'gii 1979^{ki} ayaa Axmed Faarax Idaajaa iyo Khooli (IHUN) ay ku duugeen qalin. Sidoo kale ayaa Boobe Yuusuf Ducaalena qalinka u qaatey isla silsiladaa. Labadaa buug waxaa ku jira maansooyin ay wadaagaan, heshiis ku yihiin jiritaankooga.Sidoo kale waxaa jira maansooyin aan silsilada ka mid aheyn oo ujeedo loogu darey buugga Idaajaa.

Maansooyinka ay iskaga mid yihiin kama dhigna inay kala eegteen, kala qorteen , ama ay kala ergisteen. Waxaa muuqata in mid waliba si ka kale ka madax banaan uu u soo urursadey maansooyinkaa. Muran ka dhasheyne ma jiro, mana jiro doono.

Taa waxaa suurtogalinaya garaadka koray, iyo aqoonta meel walba daadsan ee maanta si fudud lagu heli karo. Qof kastaa isagoo gurigiisa jooga ayuu abwaan kasta la xidhiidhi karaa, heli karaa cajalado la duubay, la kulmi karaa dad korka ka haya, iwm.Waxay tani la mid tahay in

maanta qof kastaa qori karo suugaantii abwaanka Shakespeare, xataa uu adeegsan karo qoraaladii hore ee laga qoray, ayse mudan tahay in uu xuso tixraaac ahaan.

Muddo iminka laga joogo dhawr gu' waxaan ku arkey mareegaha af-soomaaliga ku qoran in lagu daah-furay magaalada Nayroobi ee cariga Kiiniya buug lagu qoray maansoooyinka Siinley. Iimay suurtogalin inaan buuggaa arko, mar dambena hadal-hayntiisa maan maqal.

Bishan Febraayo 22, 2016 waxaan dhageystay wareysi ay Mareegta Hadhwanaagnews la yeelatey Abwaan Yuusuf Cismaan Cabdule(Yuusuf Shaacir) . Buuggaa wuxuu ku suntay magaca “ Diiwaanka Siinley” . Waa guul kale oo soo korodhay, aadna ay u soo dhaweynayaan bulshada Soomaaliyeed. Wuxuu muujiyey abwaanku dadaal dheeraad ah aanu ku amaanan yahay. Hase tani ma xidhayso albaabkii aheyd in isla maansadaa wax laga qori karo.

Waxaanse halkan bulshada kula wadaagayaa buug kale oo socday muddo dheer lagana qorayey Maansoooyinkaa Siinleyda, waayihii jiray xilligaa ee keenay inay maansadaasi curato, taariikh nololeedka abwaanada ka qayb qaatey inta la gaadhey, iwm.

INTan waa dul ka xaadhis ku saabsan hawsha loo galey si loo helo xogaha ku sugaran buuggan aan wali soo bixin, sona bixi kara xilli dhaw insha Allah. Waa laba qaybood. Qaybta hore waxay ku saabsan tahay xidhiidhka abwaanada aan la yeeshay, halka qaybta labaad ku saabsan ururintii maansoooyinka iyo waayahaa jiray xilligaaa:

Abwaan Cabdi Aaadna Qays:

-1989^{kii} waxaan aad uga wada sheekaysanay suugaanta. Wuxuu ila wadaagey erayga “Shaxan” oo si gaar ah ugu tilmaaman isaga. Eraygaasi raad ayuu igu reebay markuu iiga sheekereey wuxuu ku doortay. Sidaa darted ayuu saameyn ku yeeshay u magic bixinta mareegta u xilsaaran ururinta suugaanta, taariikhda iwm ee **Farshaxan**.Waxaan isla soo qaadney in uu hayo qoraalo suugaantiisa ah iyo in kale, hase yeeshee si kooban oo fariina xambaarsan ayuu iigu jawaabey. Waxaanu yidhi abwaanku: “ Maxaa wax la qori oo wax la hayni wareerkii laga maansoonayey baa wali lagu jiraayee”

-Gu'gii 1991^{kii} waxaa sidoo kale noo suurtogashay inaanu casuuno, uuna noo duubo wareysi ku saabsan taariikhdiisa iyo suugaantiisa. Bar kulanku wuxuu ahaa magaalada jabuuti

-Horaantii 2000^{kii} ayaanu mar kale wada hadlaney dhawr jeer isagoo jooga guriga inankiisaa Mustafe, ee cariga Ingiriiska arintii ayaanu mar kale ka wada hadalney ... markan wareerkii sidii uma jirin oo way soo dhawaatey..

-Sidoo kale ayaanu dhawr jeer wada hadalney isagoo jooga Denmark

Abwaan Maxamed Ibraahin Hadraawi:

- Gu'gii 1990^{kii} ayaanu ku casuunay guri ku yaala magaalada Diridhaba, markaa waxaa horyaaleysti buugaag uu qoray Cabdiraxmaan Barwaaqo... Wuxuu ka waramey sida loo diyaariyey buugga Hal-karaan iyo sida loogu baahan yahay in la kaydiyo suugaanta ummadeena, uuna kaalmo kasta u fidinayo intii karaankiisa qof kasta oo hawshaa wada... erayadaasi waxay igu sii dhiirigaliyeen jaceylkii aan u qabey Suugaanta oo runtii maansooyin ahaan uun maahee xambaarsan dhaqank iyo taariikhda bulshada reer Soomaaliland gaar ahaan..

-Marwo Ayaan Cashuur ayaa bilawday barnaamijka todobaadka Soomalaida ee gu' kasta lagu qabto cariga Ingiriiska. Ayaan oo aanu aqoon isku leenahay waxay ii suurtogalisay dhawr jeer inay ila wadaagto telefoonka abwaan Hadraawi .. dhawrkaa jeer waxaa ii suurtogashey inaanu ka wareysto waydiimaha aan uga baahnaa maansada Siinley, taariikhdiisa, iyo sabaha dhaliyey

Abwaan Siciid Saalax:

- Gu'gii 2007dii waxana tagey magaalada Minneapolis, waxaan aad ugu mahadnaqayaa Abwaan Siciid Saalax oo aan u sheegay inaan safar ku joogo magaaalada, aana doonayo inaan wareysto. Waxaa runtii sheegid mudan inuu hawlo uu lahaa joojiyey, anigana I waydiiyey halkaan rabo inuu iigu yimaado. Maalintaa waxaan aad uga wareystay taariikhdiisa, taariikhdiisa Suugaanta, iyo sababah keenay...
- Intaa ka dib waxaa dhawr jeer noo suurtogashey inaanu hawshaa ku sii anbaqaadno adeegsiga telefoonka, meel fiicana isla meel dhignay.....

Abwaan Maxamed Xaashi Gaarriye(IHUN):

- Gu'gii 2003 : Horaantii aasaaskii mareegta Farshaxan ayuu xidhiidh fariin mareegeed ah(email) nala soo sameeyey. Fariinta uu siday markaa waxay aheyd mid saabsan abwaanada ku sugaran

mareegta Farshaxan iyo siduu jeelaan lahaa inaan u wadno. Taasi waxay noo suurtogalisay inaau xidhiidh la yeelano ku saabsan suugaantiisa.

Gu'gii 2009 : Waxaa ii suurogashey inaan xidhiidh telefoon la sameeyo isagoo jooga cariga Ingiriiska. Wuxaana telefoonkiisa i siiyey qoraa Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo . Waxaa ii suurtogashey inaan waydiimo ku saabsan taariikhdiisa iyo suugaantiisa oo Siinley kamid tahay ka helo..

Geeridiisii ka dib, waxaa ii suurogashey inaan xidhiidh telefoon la sameeyo Abwaan Cabdilaahi Saleebaan oo xog badan ka haya taariikhdiisa, aaney aaad iskugu dhaw yihii, in badan ay waqtioyo kala duwan isla qaateen....

Abwaan xasan Cilmi Diiriye(IHUN)

- Gu'gii 2010 waxaa taariikhda abwaanka oo dhameystiran nala wadaagey mudane Cabdalla Xaaji. Wuxaananu soo galinay mareegta Farshaxan, sidoo kalena ku kaydinay qolka kaydka ee mareegaha Farshxan

Abwaan iyo Taariikhyan Maxamed Cabdilaahi Riiraash:

- Gu'gii 2011: Waxaa ii suurogashey inaan xidhiidh telefoon la sameeyo isagoo jooga cariga Jabuuti. Wuxaana telefoonkiisa ii suurtogaliyey inan helo qoraale Cabdala Xaaji oo aanu xidhiidh qoto dheer wada leenahay. Taariikhdiisa oo koobana waxaanu la wadaagney dhamaan bulshada ku hadasha Af-Soomaaliga oo mareegaha Af-Soomaaliga intooda badan waa la soo galiyey.

Abwaan Faarax Askari :

Waxaa ii suurogashey inaan xidhiidh telefoon la sameeyo isagoo jooga cariga Kanada. Waxaa mudan in la sheego inuu wareysigaa dhexdiisa ku sheegay inaanu haynin maansadiisii. Sidaa darteed aan u diray maansadiisii oo qoran..... Sidoo kale markii aanu ka wada hadaleynay sababta uu u galay Siinleyda , warbixintii uu I siiyey waxay sii xoojisay warbixintii hore eenu ka ururinay abwaanadaa hore, waxayna na galisay hawl kale oo cusub oo u baahan baadhid.....

Abwaan Cali Sugule:

- Horaantii Gu'gii 2005 ayey noo suurtogashay inaanu qolka kaydka ee mareegta Farsahxan ku hubsano cajalad dhan oo laga duubay abwaanka isagoo Jooga dhulkaa carabta (Imaraadka) Ka dibna waxaanu guddo galney qoritaanka taariikhdiisa, waxaanu wareysaney dad badan oo ay ka mid yihiin Boobe Yuusuf Ducaale, Rashiid Gadhweyne, iwm ...

-Sidoo kale waxaanu gudo galney ururintaa taariikhda abwanaada kale eek u jira maansada sida abwaanada Canab (IHUN), walaasheed oo ku nool Jabuuti ayaa la nooga soo qoray qoraalo,...

Ururintii iyo qoraalkii maansooyinka:

- Gu'gii 990 Waxana soo iibsadey laba cajaladood ay ku duuban yihiin maansooyinka Siinley, qoraal ahaan aan bilaabey

Gu'gii 1991.. Wuxaan ku daawadey magaalada Jabuuti abwaanada ku sugnaa halkaa eek a qayb galey Sirtii Eryga, dhawr gu' ka dibna waxaan ka helay qolka kaydka ee RTD cajalad ay ku dhan yihiin labadii barnaamij ee laga duubay Siinleyda....

-Gu'gii 2000 waxaa sidoo kale gacanteyda soo galey duubis laga dubey Abwaan Maxamed Ibraahin Warsame Hadraawi oo lagaga duubay cariga Norway.

- Gu'gii 2000 Wuxaan sidoo kale ka soo iibsadey magaada Toronto ee cariga Kanada cajalad ay ku duuban yihiin maansooyinka Siinley .. siina wadey qoraalkii maansooyinka

- Gu'gii 2003 Wuxaan u hawlgaley sameynta mareegaha Farshaxan, si hawshan ug balaadhato Siinley, waxaananu qornay ilaa iminka Silsilado dhawr ah, taariikhda abwaano badan, taariikhda hormoodkii SNM, hormoodka Soomalaialnd, iwm dhamaan waxay ku jiraan qolka kaydka ee mareegaha, inta badana waanu la wadaagney bulshada

- Gu'gii 2005 waxaa qolka kaydka ee mareegta Farsahxan soo gashey cajalad uu dubay Abwaan Maxamed Ibraahi Warsame waxaanu leeyahay hordhaca abwaanku: "Cajaladanina waxay hadiyad u tahay saaxiibkay Siciid Ismaaciil Daahir iyo saaxiibadiisa kula nool jamhuuriyada

Jabuuti”. Sidoo kale waxaa ku jira hordhac uu kaga sheekaynayo sababah dhaliyey” .. Sidoo kale abwaanku wuxuu xusayaan sidan” Wuxaan filayaa ragga is dhaafsaadey Siinley sida uu maanta u Koran yahay uma wada kornayn”.

Tani waxay naggu dhalisay in baadhid danbe aanu galno waayo weedhaasi waay xanbaarsan tahay fariin qoto dheer, waxaaney keensaneysaa in la ogaado korniinkaasi halka uu daaran yahay

-Sidaa darted ayaanu dib ugu noqonay abwaanka laftigiisa, iyo abwaanada kale ee aanu gaadhi kareynayba...

Gu’gii 2007 Maxamed-Amiin Xuseen oo jooga Yurub waqtigiisa firaaqaduna dhaamey kayga Ayaan u dirnay cajladihii Siinley oo Digital ah, isan halkii ayuu ka sii anbaqaadey wadeyna muddo.... Markii danbe wuu mashquulay ... Qurbo iyo hawshiisa

Gu’gii 2008 ilaa Gu’gii 2012 waxaanu bilawnay in aanu sii dayno, bulshadana la wadaagno qoraalo ku saabsan Siinley oonu ugu magac darney “Taxanaha Maansada Siinley”.....

-Ka dib anigaa la wareegay markay u eekaatey inaan maansoooyinkii wada helnayn, waxaan bilaabey dib u saxid, dib u qorid, iyo quraar..... Waxaa kaloo markan hareer socday qoraalo ku saabsan waayihii dalkii la odhan jiray Jamhuuriyada Dimuqraadiga ee Soomaaliya, Ruwaayadihii xilligaa ay Siinleydu bilaabnmi doonto soo baxey, maansoooyinkii kale ee isla xilligaa soo baxey, kala fogaanshihii laba ummadood ee Soomaaliya iyo Soomaaliland, iwm

-Taariikh ururiye iyo qalin-maal Rashiid Sh Cabdilaahi(Rashiid Gadhweyne) oo aad uga ag dhawaa abwaanada maansoooyinka tirihey, xog badana ka haya ayaanu dhawr jeer khadka telefoonka ku wareysaaye waydiimo ku saabsanaa sababaha dhaliyey maansoooyinka, iyo hab-fikirka kala duwanaa ee abwanaada ka qayb qaatey maansoyinka.

-Hawshan gabagbada ku dhaw ayaa Gu’gii 2012 waxaa sidoo kale oqlka kaydka ee mareegaha Farshaxan soo galey Maansoooyinkaa oo uu duubay Abwaan Shaacir....

- Sidoo kale waxaan guddo galney raadintii ruwaayadii Aqoon iyo Af-garad oo xidhiidh iyo saameynba ku leh Siinleyda...Wuxaan ku mahadsan Xasan Cabdi Madar oo buugaasoo dhameystiran nala wadaagey.

Silsiladaha Kale ee aanu qoraal ahaan ku hayno ama aanu ururinteeda ku jirno badhna ka hayno , ee isku dubaridku uun u hadheyna waxaa ka mid ah:

- Silsiladii Xaydha
- Silsiladii Guba
- Silsiladii Hawd iyo Woqooyi
- Silsiladii Hurgumo
- Silsiladii Maruuryo
- Silsiladii Qaafley-2012
- Silsiladii Siinlaayaa gabeyey -2010
- Silsiladii Da 'ley 2014
- Silsiladii Ga'layda (ee ay ugu horeysay maansadii Gaylama ee Abwaan Axmed Aw Geedi)
- Silsiladii Ga'leyda (ay ugu horeysay maansadii Gunaad ee abwaan Weedhsame)
- Sisiladii Faafreeb 2014

Diyarintii iyo qoristii :

Fu'aad Sheekh

Bahda Mareegaha Farshaxan

www.Farshaxan.org iyo www.Farshaxan.com